

**MACLUUMAAD MUHIIM AH OO KU SAABSAN  
SHIR MAAMULIS KIIS**

Kiiskaaga qoys waxa loo ballamiyay shir maamulis kiis. La-talinta dacwad-qaadista iyo dhinacyada arrintu ka dhexeyso waxa laga rabaa inay yimaadaan haddii aan:

- Caddeyn Beddel u ah Shir (*Certificate in Lieu of Conference*) (form FM-054) laga xereyn maxkamadda kahor taariikhda shirka. Waraaqdan, oo laga heli karo barta internetka ee Laanta Garsoorka oo ah: [http://courts.maine.gov/fees\\_forms/forms](http://courts.maine.gov/fees_forms/forms) ama laga heli karo xafiiska karaaniga ee Maxkamadda Degmada ee Maine waxa la xereysan karaa kaliya marka dhinacyadu ku heshiiyaan ku-talagalyo ku meel-gaadh ah oo ku saabsan carruurta;
- Shirka Maamulista Kiiska ayaa dib loo dhigay taasoo waafaqsan Xeerka Habraaca Madaniga ah ee Maine 110A(3)(A)(ii); ama
- Dhinacyada ayaa ku heshiiyay wax ka beddelid lagu sameeyo xukun ama amar jira oo waraaqaha haboon ka xereystay maxkamadda kahor taariikhda shirka.

**WAXA LAGUGU AMRI KARAA INAD TIMAADID DHEXDHEXAADIN. FADLAN KAALAY SHIRKA ADIGA OO  
DIYAAR U AH INAD BIXISID QAYBTAADA KHARASHKA DHEXDHEXAADINTA.**

Arrimaha soo socda ayaa lagaga hadli doonaa shirka, waxana laga yaabaa in markaas la soo saaro amar ama dhegaysi ku xiga xiitaa haddii aan la xereysan soo-jeedin gargaar ku-meelgaadh ah:

1. Ku-talagalyada ku-meelgaadh ah ee loogu talagalay carruurta, oo ay ku jiraan hoy, xidhiidh waalid/ilmo, caymis caafimaad iyo taageero ilmo; mas'uuliyad ku-meelgaadh ah oo ku saasan bixinta daymaha muddo ah; iyo taageero qofka la is qabo oo ku-meelgaadh ah (haddii ay khuseyso). *Waa inad xereysid waraaqda FM-050, Caddeyn Taageero Ilmo. Waxa la rabaa muddo aan ka dambeyn 3 maalmood kahor shirka;*
2. Arrimaha muranku ka jiro;
3. Xad wakhti oo ku saabsan sidii kiiska loogu dhaqaajin lahaa xalin, kala beddelasho macluumaad (bandhigid), iyo dhexdhexaadin;
4. Bixinta kharashyo, oo ay ku jiraan wixii ah kharash dhexdhexaadin maxkamad iyo ujrada qareenka;
5. Taariikhda iyo wakhtiga kulanka maxkamad ee ku xiga. **Haddii hal dhinac xukun la saaro maqnaansho daraadeed ama haddii kiiska ay ku jirto dejinta ama fulinta waajibaad taageero ilmo, waxa laga yaabaa in dhegaysi dhaco maalinta shirka;**
6. U-gudbin xaakin. **Marka xuquuqda iyo waajibaadka waalidka muran ka jiro, waxay dhinacyadu adeegsan karaan xuquuqdooda in xaakin go'aamiyo xuquuqda iyo waajibaadka waalid oo ku-meelgaadh ah.** Si tan loo sameeyo, waa in hal dhinac xereysto codsi qoraal ah oo u ka xereysto karaaniga maxkamadda kahor ama wakhtiga shirka;
7. Arrimaha kale ee muhiim u ah kiiska, oo ay ku jiraan balse aan ku koobnayn imaanshaha barnaamij waxbarasho waalid; baadhis hidho-side; raadin shaqo; magacaabista mas'uul ku-meelgaadh ah (guardian ad litem); iyo/ama qiimeyn caafimaad maskax.

Kadib waxa Guddomiyhu soo saari doonaa Amar Maamulis Kiis oo ku xiga shirka kaasoo go'aamin doona sida ay u soconayaan waxana laga yaabaa in la soo saaro amaro kale, sida amar ku-meelgaadh ah, ama amar lagu fulinayo waajibaad taageero ilmo.

**DIGNIIN**

**Haddii ad tahay dhinaca jawaabaya oo ad rabtid inad diidid dacwadda ama soo-jeedinta, waa in ka-jawaabis lagu xereysto gudaha xadka wakhti ee u dejiyay xeer ama xukun maxkamad. Ha sugin illaa wakhtiga shirka maamulista kiiska si ad u sheegtid diidmooyinkaaga.**

Waxaad xaq u leedahay inad timaadid oo lagu dhegaysto dhammaan kulannada maxkamadda (dacwad qaadis, dhegaysi, shir, dhexdhexaadin). Haddii ad ka baaqatid inad timaad dhammaan ama mid ka mid ah kulannada maxkamadda adiga oo aan haysan sabab wacan, waxa laga yaabaa in kiiskaaga laga qaado tallaabo sharci inkasta oo aanad meesha joogin. Tan macnaheedu waxa weeye in Maxkamaddu, adiga oo maqan, soo saarto amar ku-meelgaadh ah AMA qabato dhegaysi kama-dambeys ah oo soo saarto amar kama-dambeys ah ama xukun ku saabsan mid ama dhammaan arrimaha ku jira kiiskaaga, oo ay ku jiraan balse aan ku koobnayn aabo-ahaansho ama waalid-ahaansho, xuquuqda iyo waajibaadka waalidka ee ku saabsan carruurta (hayn ilmo, goob deganaansho, booqasho, iwm.), taageero ilmo, mas'uul ka ahaansho, korsasho, beddelid magac, taageero/masruuf qof la is qabo, ujrada qareenka, iyo qaybinta maalka guurka iyo maalka aan ahayn ka guurka (dayn, dhul iyo guryo, baabuur, maal shakhsi, xisaabo hawlgab iyo shaqo-ka-fadhiisin, iwm.). Waxa kale oo laga yaabaa in Maxkamaddu laasho wixii ah codsi ee ad xereysatay haddii aanad iman.